



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay:

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Janaayo 11, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS (Hay'adaha Maamulka Kiiska: fadlan si ballaaran u wadaaga, oo ay ku jiraan daryeel bixiyayaashu. Daryeel bixiyayaasha waxaa la ogeysiiyaa iyada oo lagu saleynayo email la geliyo eXPRS)

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Korarka ku meelgaarka ah ee qiimaha

Markay ahayd Janaayo 8, 2021, Gudigga Isku dhafka ah ee Xaalada Degdega ah ee Baarlamaanka Gobalka Oregon ayaa ansixiyay [korar dhan 5 boqolkiiba](#) oo lagusoo rogay guryaha dadka waayeelka ah iyo carruurta, iyo sidoo kale nashaadada taageerada ee maalintii iyo adeegyada shaqada oo lagu baxsho wakaaladaha Medicaid. Kordhintu waa mid horay ka bilaabanaysa kana bilaabanaysa Janaayo 1, 2021 waxayna soconaysaa muddo lix bilood ah.

Si gaar ah, korarka ayaa qabanaaya:

- Guryaha Kooxaha Waayeelka ah (SE50)
- Guryaha Kooxaha Carruurta (SE142)
- Shaqada Sida Gaarka ah loo Taageero (OR401)
- Marinka Shaqada (OR541)
- Nashaadaadka Taagerada Maalinta (OR542)
- Shaqada Koox Yar (OR543)
- Soo kabashada (OR539)
- Daryeelka Xaadirista Shaqada (OR545)

Maal gelintaan waxaa lagu ansixiyay ayadoo la aqoonsanaayo dhibaatooyinka COVID-19 ku keenay adeeg bixiyaasha nidaamka naafada kobaca. Korarkaan waxaa loo ansixiyay inuu gacan ka gaysto saamaynada aafada COVID-19 ku reebay hooyga daryeelka, shaqada iyo adeeg bixiyaasha DSA.

Adeeg bixiyaasha iyo shirkadaha maamula kiisku uma baahna inay qaadaan talaabo – qiimayaasha la cusboonaysiiyay ayaa si ootomaatig ah uga dhacaaya nidaamkaan.

Waxaan kamahadnaqayaa dhammaan shaqada adag si loo xaqiijiyo in adeegyadeenu ay buuxinayaan baahiyaha dadka aan u adeegno. Waad ku mahadsan tahay dadaalkaaga joogtada ah si loo dhawro badqabka iyo caafimaadka dadka reer Oregon ee qaba I/DD.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa*  
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow [website-keena](#).*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.